

Iska baar cagaarshoowga B



Cagaarshoowga B waa fayras weerara beerka. Cagaarshoowga B wuxuu keeni karaa kansarka beerka, laakiin waxaa jira daawooyin kaa caawin kara beerkaaga inuu caafimaad qabo.



Dadka qaba cagaarshoowga B badanaa calaamado ma laha, laakiin waxay cudurka u gudbin karaan dadka kale.



Waxaa jira tallaal ammaan ah oo waxtar leh oo ka hortagi kara cagaarshoowga B.

Cagaarshoowga B waxaa faafiya:



Hooyada oo u gudbisa ilmaha inta lagu jiro dhalmada



Inuu ku gaaro dhiigga qof qaba cagaarshoowga B



Xiriir galmo



Isla wadaagista agabka daryeelka shaqsiyeed sida sakiinta, burushka ilkaha, ama ciddiyo jarta

Cagaarshoowga B MA ay faafiyaan:



Wadaagista cuntada ama weelka cuntada



Is taabashada sida hab siinta, dhunkashada ama in gacmaha la is qabsado



Biyaha ama hawada

Yey tahay in cagaarshoowga B laga baaro:

- Haweenka uurka leh
- Dadka la nool qof qaba cagaarshoowga B
- Dadka ku dhasha meelaha uu cagaarshoowga B ku badan tahay, sida Afrika ama Asia
- Dadka waalidkood ka soo jeedo meel cagaarshoowga B ku badan yahay, sida Afrika ama Asia